THE University of Vermont HEALTH NETWORK
Central Vermont Medical Center

# Xeerka oo Kooban

### Hel caawimada bixinta kharashka daryeelka caafimaadka.

Waxaanu haysanaa barnaamijka kaalmada maaliyada si aanu u caawino inaad awoodo daryeelka aad u baahan tahay.

### Waa maxay barnaamijka kaalmada maaliyadu?

Waxaanu siinaa kaalmada maaliyada dadka aan haysan caymis. Waxaan sidoo kale siinaa kaalmada dadka haysta caymiska ee leh kharashyada jeebka ka baxsan ee aanay awoodi karin. Waxaa loo isticmaali karaa daryeelka joogtada ah iyo gurmadyada. Daryeelku waa inuu caafimaad ahaan lama huraan u ahaadaa caafimaadkaaga in loo oggolaado kaalmada.

### Kumaa heli kara kaalmada maaliyada?

Si loogu qalmo:

- **U qalmidu waxay ku salaysan tahay dakhliga iyo hantida**; arag codsiga wixii ah caddaynta lama huraanka ah.
- **Waa inaad tahay qof "degen Vermont"** – tan waxaa ka mid ah ardayda, dadka laga shaqaaleeyay Bermont, dadka muhaajiriinta ah ee aan sharciga haysan, dadka ku nool Vermont laakiin haysta guriyayn degen kuma jiraan booqdayaasha ama dadka safarka ah iyaddoo daryeelku soo baxo mooyaane.
- **Dakhligaagu waa inuu ka yaraadaa xadka.** Waxaa jira xadadka dakhliga kala duwan ee bilaashka ah iyo daryeelka kharashka hoose. Arag jaantuusyada.
- **Ilahayga "dareerahu" waa inay ka yaraadaan xadka.** Kuwan waa lacag caddaan ah, kootooyinka kaydka iyo kuwa lacagta la dhigto, iwm. (Gurigayga koowaad, baabuurka, iyo kootooyinka hawl gabka looma tirin doono wax kugu lid ah adiga.)

## Xadadka dakhliga

Hel cabirkaaga qoyska iyo dakhliga ee jaantuuska hoose. Dadka badankooda, cabirkaaga qoysku waxay noqon doonaa dadka ku qoran cashuurahaaga. Haddii aad samayso lacag badan daryeelka bilaashka ah, waxaad u qalmi kartaa daryeelka kharashka hooseeya.

## Daryeelka bilaashka ah

**Waxaad heli kartaa daryeel bilaash ah (bixi $0) haddii dakhligaaga qoysku ka hooseeyo 250% ee Heerka Saboolnimada Federaali (FPL).** Sanadkii 2024, dakhligaagu waxay u baahan doonaan wax ka yar:

| Cabbirka Qoyska | Dakhliga ugu badan |
|---|---|
| 1 qof | $37,650 |
| 2 qof | $51,100 |
| 3 qof | $64,550 |
| 4 qof | $78,000 |
| 5 qof | $91,450 |
| 6 qof | $104,900 |
| 7 qof | $118,350 |
| 8 qof | $131,800 |

## Daryeelka kharashka hoose

**Haddii dakhligaaga qoysku uu ka hooseeyo 400% Heerka Saboolnimada Federaali (FPL), waxaad u qalmi kartaa ilaa 75% lacag dhimis ah.** Sanadkii 2024, dakhligaagu waxay u baahan doonaan wax ka yar:

| Cabbirka Qoyska | Dakhliga Ugu badan |
|---|---|
| 1 qof | $60,240 |
| 2 qof | $81,760 |
| 3 qof | $103,280 |
| 4 qof | $124,800 |
| 5 qof | $146,320 |
| 6 qof | $167,840 |
| 7 qof | $189,360 |
| 8 qof | $210,880 |

*Macluumaad badan oo ku yaala dhabarka*

## Daryeelka masiibada ah

Na waydii wax ku saabsan masiibada (si khatar ah u dhaawacantay ama jirada) daryeelka haddii aad ugu qaamaysan tahay cusbitaalka lacag badan, laakiin dakhligaagu uu ka sareeyo inaad u qalanto daryeelka bilaashka ah ama kharashka hoose. Noocan kaalmada ah waxaa loo heli karaa bukaanada kuwaas oo hadhaagu uu ka badan yahay 20% ee dakhligooda qoyska sanadlaha ah.
**Waxaanu kaa caawin karnaa haddii aad u qalano.**

## Adeegyaa La daboolay

- Adeegyada caafimaadka degdega ah ee lagu bixiyay goobta qolka gurmadka ah;
- Adeegyada degdega ah ee xaalada taas oo, haddii aan degdeg loo dawayn, ay keeni karta isbeddel waxyeelo leh gudaha heerka caafimaadka ee shakhsiga;
- Adeegyada lama huraanka ah ee caafimaad ahaan la doorto

## Adeegyada AAN la daboolin

- Adeegyada Qurxinta/Balaastiga ah
- Adeegyada dhalma la'aanta/dhalmada
- Daryeelka aan caafimaad ahaan lama huraan ahayn
- Cilmi baadhida/Adeegyada tijaabada ah
- Daryeelka bukaanka caalamiga iyaddoo adeega lagu bixiyo qolka goobta gurmadka mooyaane; loo qeexo booqdayaal ahaan maaha dadka degen
- Adeegyada lagu dhammaystiro xaga Apple Tree Bay

## Sida loo codsado

Waxaad codsan kartaa ka hor ama ka dib markaad hesho adeegyada caafimaadka. Haddii aad codsato ka dib markaad hesho adeegyada, waa inaad kuwan ku samayso gudaha hal sano markaad hesho biilka koowaad.

### Raac tallaabooyinkan:

1. **Hel codsi bilaash ah.**
   - Qo ahaan: Diiwaangelinta
   - Onlaynka ah: Financialcounseling@cvmc.org
   - Telefoonka: Soo wac (802) 639-2719
2. **Buuxi codsiga.** HA banayn wax qaybo ah. Ku dar dhokumentiyada taageeraya sida lagu sheegay codsiga.
3. **Sii ama noogu soo dir codsigaaga aad dhammaystay.**
   - Gee xaga: CVMC Registration or Financial Services, 3 Home Farmway, Montpelier VT 05602
   - Boostada ugu dir:
     Ku: Financial Clearance
     Central Vermont Medical Center
     PO Box 547
     Barre, VT 05641-9902

### Maxaa dhacaya marka xigta?

Waxaad naga heli doontaa warqad 30 maalmood ee soo socda. Waxay sheegi doontaa haddii aad oggolaatay, diiday, ama u baahan tahay inaad macluumaad badan soo dirto.

Haddii codsigaaga la diido, waxaad rafcaan ka qaadan kartaa go'aanka. Codsiyada rafcaanada waxaa loo diraa Khabiirka kaalmada Maaliyada Bukaanka qoraal ahaan 60 maalmood gudahood marka la diido codsiga oo waa inuu ku daraa sababta codsiga.

## Sida loo helo caawimada buuxinta codsiga

- **Booqo xafiiskayaga la talinta maaliyada:** 3 Home Farmway, Montpelier VT 05602
- **SOO WAC:** (802) 847-8000

*Macluumaad badan oo ku yaala dhabarka*

# Taageerada luqadda ee bilaashka ah

Waxaanu siinaa caawimo bilaash ah dadka qaba baahiyaha wada xidhiidhka ama luuqada. Waxaan sidoo kale caawin karnaa kuwan ugu baahan macluumaadka qaabab kale. Turjubaanada iyo taageerada turjumaada 802-847-8899.

# Macluumaad dheeraad ah

### Kumaa aqbalaya kaalmada maaliyada?

Dhammaan adeeg bixiyayaasha laguma daboolo xeerkayaga kaalmada maaliyada. Ka eeg liiskayaga halkan: Kaalmada Maaliyada (cvmc.org). Waxaad na waydiin kartaa wax ku saabsan dhakhtarkaaga

### Akhri xeerka buuxa

Tani waa luqadda cad ee kooban ee xeerkayaga kaalmada maaliyada. Xeerkayga buuxa waa kan: Kaalmada Maaliyada (cvmc.org).

# Takoor la'aanta

Wax kuma takoorno iyadoo ku salaysan isirka, midabka, sinjiga, qaabka galmada, aqoonsiga sinjiga, heerka guurka, diinta, tafiirta, asalka qaranka, muwaadinimada, heerka laanta socdaalka, luqadda koowaad, naafanimada, xaalada caafimaadka, ama macluumaadka hidda sidaha.